



Xogtaan waxay ku socotaa adiga oo ah masuul ilmo u dhigtaan xanaanada.

Sideedaad ayaan bilaabaynaa isticmaalkal Unikum

Bilowga teeramka dayr-ta waxay bilaabayaana dhamaan iskuulada degmada Göteborg leedahay isticmaalka aalada dhijitaalka ah ee Unikum. Taasi waxay ka dhigan tahay in Unikum badalayo Hjärntorget kaasoo ay xanaanooyin badan isticmaalaan maanta.

Muxuu yahay Unikum?

Unikum waa aalad dhijitaal ah oo laga isticmaalo xanaanada, diiradna saaraya barashada, dukuminti garayn-ta iyo xanaanada tayo ka shaqayn teeda. Unikum waxaad kala socon kartaa ka masuul ahaan ilmahaaga hormarkooda iyo barashadooda. Halkaan waxaa kaloo laguugu soo gudbinayaa si joogta ah xog muhiim ah kaagana imaanaysa ilmahaaga xanaanadiisa.



Maxaan u badalaynaa Hjärntorget?

Unikum wuxuu in badan u wanaagsan yahay isticmaalaha sida waalidiinta iyo shaqalaha wuxuuna fursad fiican siinaya wada xiriirka iyo dib u eegida iyo ka qayb galinta.

Hjärntorget waxaa la xirayaa 30 bisha lixaad

30 ka bisha lixaad waxaa la xirayaa Hjärntorget, adiga masuulka ahna ma gali kartid wixii xiigaas ka danbeeya. Hjärntorget waxaa ku jira kara xog ilmahaaga ku saabsan tusaale ahaan sawiro iyo dukumintiyada. Hadii aad shaqsiyan rabtid in aad xogtaas wax meel ka dhigatid waa inaad samaysaa ka hor inta aan la xirin Hjärntorget. [Halkaan waxaad ka akhrin kartaa xog dheeri ah sida aad sawirada iyo dukumintiyada Hjärntorget u keydin kartid.](#) Sidoo kale waxaad ka helaysaa tilmaamaha bogaan goteborg.se/forskola, kadib waxaa doorataa *Förskola och familjedaghem/Hjärntorget*.

Hadii ilmahaaga xanaanadiisu aysan isticmaalin Hjärntorget maanta, majiraan xog adiga ka masuul ahaan aad meel dhigan kartid. La hadal shaqalaha xanaanada ilmahaaga hadii aadan hubin.

Dukumenti guud

Dhamaan dukumentiga ku jira Hjärntorget waa dukumenti guud. Ayadoo la tix raacayo sharciga keydinta waa in xogtaas guud ay keydiyaan maamulku.

Dukumintiyada ay dhici karto iney jiraa oo ilmahaaga ku saabsan oo ku jira Hjärntorget waxaa loo keydin doonaa si dhijitaal ah. Adiga kaliya oo waalidka ah ayaa xaq u leh in aad xogtaas heshid. Dukumentigaan wuxuu ku jiri doonaa keydka waligiis, si ilmuhu xogtaas u heli karaan markey waynaadaan.

Su'aalo ma qabtaa?

Waxaad xog dheeri ah ka heli doontaa ilmahaaga xanaanadiis inta lagu jiro gu'ga iyo samarka. Hadii xanaanadu isticmaasho Hjärntorget, waxaad xogta ka heli doontaa meeshaas. Sidoo kale waxaad intaa ka badan ka akhrisan kartaa ciwaanka xogta cusub ee xanaanda (*Aktuellt i förskolan*) ee aad ka helaysid bogaan goteborg.se/forskola.